

Ogaysiiska Dib u eegsita uqalmida Da'da Sagaal iyo tobnaad (19)

Taariikh

MAGACA IYO CIWAANKA MACMIILKA

MAGACA IY CIWAANKA WAKIILKA MACMIILKA

Ujeedo: **Ogaysiiska Dib u eegsita uqalmida Da'da Sagaal iyo tobnaad (19)**

Waxaad hadda uqalantaa barnaamijka Developmental Disabilities Administration (DDA). Uqalmitaankaaga DDA waa in dib u eegis lagu sameeyaa kahor intaadan gaarin dhalashadaada labaatanaad (20^{aad}). Macluumaadka aan hayno ayaa noqon kara mid aan ku filnayn inaad sii wadato uqalmitaankaaga DDA sabab la xariirta xaaladaha soo socda midkood: Naafannimada Kala-dhimmanaanta, Naafannimada Maskaxda iyo Wada-shaqeynta Murqaha, Qallalka, dhagraarowga ama Ootiisam, nafo kale oo dhanka Neerfeyaasha ah **ama** Xaalad Kale oo la mid ah Naafada Garaadka. Hoos ka eego Jaantuska Caddeymaha Lagaa rabo si aad u sii ogaato macluumaadka lagaa doonaayo.

Maxaad u baahan tahay inaad samayso?

DDA waxaa farxad u ah inay soo dirto macluumaadka loogu baahan yahay go'aankaan ku celiska ah. Haddii aad doonayso in DDA ay dirto macluumaadka, fadlan buuxi foomka lifaaqa kujira ee ogolaanshaha:

1. Ku qor foomka ogolaanshaha magacyada goobaha, adeg bixiyaasha, iyo xarumaha aan ka codsan karno macluumaadka. Ku qor meelaha lagala xariiraayo dhammaan goobaha ku qoran foomka ogolaanshaha.
2. Saxiix oo taariikhda ku qor foomamka lifaaqa kujira, kadibna
3. Kuceli foomamka DDA.

Maxaa dhacaaya haddii aanan ka jawaabin codsigaan?

Fadlan noogu soo jawaab sida ugu dhakhso badan ee suuragalka ah, laakiin aan ka danbayn 90 maalmood kahor intaadan gaarindhalashadaada labaatanaad (20^{aad}). Haddii aanaan jawaab kaa helin, waxaan dib u eegis ku samayn doonaa u qalmidaada anagoo adeegsanayna macluumaadka aan kaa hayno ee ku jira faylkaaga macmiilka. Haddii aan wayno macluumaad nagu filan si aan u xaqiijino go'aanka u qalmida, markaas uqalmitaankaaga DDA waa la joojinayaa markaad gaarto dhalashadaada 20^{aad}.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah la xariir:

MAGACA

NAMBARKA TALEEFANKA

CIWAANKA IIMEELKA

Qofkii naga codsada waxaan u haynaa koobbiga sharciyada gobolka ee uqalmitaanka ama ka eego internetka <https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

Waxaa lifaaqa kujira: Jaantuska Caddeymaha Lagaa doonaayo
Foomka Ogolaanshaha (DSHS 14-012)

Og: Faylka macmiilka

Jaantuska Shuruudaha Caddeymaha

Xaallada Naafada	Xanuunka Lagaa helay	Dhakhtarka ku baaray	Cadaymaha lagaa Rabo
Naafannimada Kala-dhimmanaanta	Naafannimada Kala-dhimmanaanta	Dabiibe Cilmi-nafsi Shati Haysta, Dabiibe Cilmi-nafsi Haysta Citiraafka Washington ama dabiibe kale oo cilmi-nafsi oo ka shaqeeya iskuul oo citiraaf ka haysta Ururka Dabiibeyaasha Cilmi-nafsiga Iskuullada	Warbixin Cilmi-nafsi oo Buuxda oo ay ku jirto natiijada imtixaanka garaadka iyo garashada (Full Scale IQ) oo ka badan laba kala-fogaan in ay ka hooseeyo natiijada celceliska heerka iskufilnaanshaha oo ka badan laba kala-fogaan in ay ka hooseeyo celceliskii, lana sameeyey xilligii ugu dambeeyey oo ah 36 bilood.
Naafannimada Maskaxda iyo Wada-shaqeynta Murqaha	Naafannimada Maskaxda iyo Wada-shaqeynta Murqaha Curyaannimo Afarta-addin Curyaannimo Hal Dhinac Curyaannimada Kogsanaanta Murqaha	Dhakhtar Shati Haysta	Ku bilaabatay da'da 3 sano jir, ka hor iyo macluumaad taageero u ah baahida caawimaad ah maalin kasta siyaabo noqon kara laba sabab ama ka badan (musqul-gelidda, qubeyska, cuntada, lebbiska, dhaqaaqidda, ama xiriirka wadhadalka.
Qallal	Qallal ama cillad ah Suuxdimo	Dhakhtar Neerfaha ku Haysta Citiraaf	Waxa ilmuhu qabo ee ugu jira feylka caafimaadka and baaristii neerfaha, xaqiijin dhakhtarka daaweynta guud ama dhakhtarka neerfaha in ay jirto suuxdimo joogto ah oo aan la xakameyn karin, iyo imtixaamidda iskufilnaanshaha oo caddeyneysa dhibaato ah heerka iskufilnaanta ee ilaa laba meelood oo celceliska ilmaha kale ka hooseeya.
Agnaan ama ootiisam (diiwaanka DSM-IV-TR)	Agnaan ama Cilladda Aganka Diiwaanka 299.00 ee DSM-IV-TR	Dabiibe Cilmi-nafsi Haysta Shati, Dhakhatar Haysta Shati ama ARNP ururka xarunta cilladda agnaanta, dibudhaca maskaxda, ama xarunta hufnaanta aqoonta, ama Haysta Citiraafka Guddi: Dhakhtarka Neerfaha, Dhakhtarka Dhimirka, ama Dhakhtarka Carruurta ee Habdhaqanka iyo Koboca Maskaxda	Qiimeyn buuxda oo ah DSM-IV-TR oo noqoneysa sida wax loogu helay, caddeynta dibudhaca ama waxyaabihii aan caadiga ahayn 3 sano jir ka hor sida macaamilka dadka, luuqadda, xirfada wada xiriirka ama habka ciyaarta, iyo baaristii iskufilnaanshaha oo muujineysa dhibaata waxqabsiga iskufilnaanshaha in ka badan laba wax oo ka hooseeya celceliska.
Cilladdaha Agnaanta Badan (diiwaanka DSM-5)	Ma'i Eseese o le Vaivai o le Mafaufau 299.00 Cilladdaha Agnaanta Badan Diiwaanka DSM-5 oo ay ku jirto heerarka daran ee 2 ama 3 jaantuska labada qoraal	Dabiibe Cilmi-nafsi Haysta Shati, Dhakhatar Haysta Shati ama ARNP ururka xarunta cilladda agnaanta, dibudhaca maskaxda, ama xarunta hufnaanta aqoonta, ama Haysta Citiraafka Guddi: Dhakhtarka Neerfaha, Dhakhtarka Dhimirka, ama Dhakhtarka Carruurta ee Habdhaqanka iyo Koboca Maskaxda	Qiimeyn buuxda diiwaanka DSM-V oo noqoneysa gebi ahaan wixii la helay, caddeynta dibudhaca ama iskufilnaansho la'aantii aan caadiga ahayn 3 sano jir ka hor heerarka daran ee 2 ama 3 jaantuska labada dhinac ee heerka cabbirka, baaristii iskufilnaanshaha oo muujineysa dhibaato muuqata oo ah waxqabsi in ka badan laba wax oo kala fog, iyo FSIQ oo ah hal wax oo hooseeya ama wax ka badan celceliska – ama – noqoneysa heerarka Cilladda Agnaanta oo dhan 299.00 diiwaana DSM-IV.

Arrin Neerfe ama Xaalad Kale oo la mid ah Naafannimada Kaladhimmanta	Cillad Neerfe ama Hidde-side lagu yaqaan inuu keeno kaladhimmantaan iyo waxqabsi la'aan ah iskufilnaansho	Dhakhtar Shati Haysta	Cabbirid buuxda e Garaadka Qofka (Full Scale IQ) oo ah garaadka iyo garashada oo heer ahaan ka badan 1.5 kala fogaanta ka hooseysa celceliska in ay tahay dhib iskufilnaansho oo ka badan laba kala-fogaan in ay ka hooseyso celceliska.
<p>Ogow: Foomkan waa hoggaan guud ahaan oo keliya oo DDA waxay kaaga baahan kartaa macaluumaad ama qiimeynta Dukimitigaan waa kan ugu horreeya ee lagu go'aamiyo uqalmiinta . Uqalmiinta DDA waxaa lagu go'aamiyaa farqada 388-823 WAC.</p>			